

Ka hor baaritaankaaga waxaan ka duulaynaa nolol maalmeedka qaybaheeda kala duwan. Waxaad sharaxaad ka bixinaysaa awoodaada (waxaad adigu ku filan tahay) iyo baahiyahaaga (waxa aad u baahan tahay in lagaa caawiyo), hadafyadaada (waxaad jeceshahay inaad sii wadato samayntooda ama aad rabtid inaad awood u yeelato inaad u madax banaanaatid samayntooda) iyo fikaradaada ku saabsan sida aad u gaari kartid hadafyadaas.

Qaybo ka mid ah nolool maalmeedka waxay noqon karaan:



Barashada iyo isticmaalka cilmiga, waxayna ku saabsan tahay sidaad xogta u raadsanaysid, dhibaatooyinka kula soo darsa u xalinaysid iyo go'aan gaarida.



Shaqada iyo shuruudaha guud ee nolool maalmeedka la xiriira tusaale ahaan sida aad uga bixi kartid nolol maalmeedka iyo sida aad xalisid istareeska.



Xiriirka, sidaad xogta u qaadanaysid, u hadlaysid iyo sidaad u isticmaalaysid qalabka iyo farsamada si aad xiriir u samaysid.



Guuritaan tusaale ahaan sidaad u isticmaalaysid jirka, awoodaada inaad qaadid oo xanbaartid alaab, sidaad ugu kala soconaysid meelo kala duwan iyo sidaad u isticmaalaysid qalabka lagu guuro.



Qofku inuu is daryeelo, waxay ku saabsan awood aad u leedahay inaad dhowrato nadaafadaad, jirkaaga xanaanaysid iyo inaad masuuliyad iska saartid caafimaadkaaga iyo amnigaaga.



Nolosha guriga, waxay ku saabsan tahay awooda aad u leedahay inaad samaysato guri iyo inaad daryeesho guriga tusaale ahaan inaad soo adeegto, cunto karisid iyo inaad nadiifisid.



Isdhexgalka iyo xiriirka dadka kalaa dhaxeeya, awooda aad u leedahay inaad samaysid, haysatidna xiriirada kalaa dhaxeeya dadka kale.



Waxbarasho, shaqo, camal iyo nolol dhaqaale, awoodaada aad u leedahay inaad shaqo hesho oo haysato, isticmaasho lacagta iyo inaa dalbato wax yaalo kala duwan.



Isku xirnaanta bulshada, bulshada iyo nolosha muwaadiniinta awoodaada aad u leedahay inaad ka qayb qaadato arimaha bulshada ee qoyska kaaga banaanka ka ah, tusaale ahaan inaad ka qayb qaadato xiliyada firaqada waxqabadyada dhaca ama inaad codeysid doorashooyinka guud.



Dareenka amni wuxuu ku saabsan yahay sida aad u dareemaysid amni ama amni daro markaad jawiyo kala duwan ku sugan tahay.



Taageero shaqsiyadeed oo ka timid qof daryeelaya ama caawinaya qof qaraabadiisa ah tusaale ahaan hadii taageerada aad dalbanaysid sidoo kale aad u rabtid iney taageero ama nasin u noqoto qof ku daryeela ama ku caawiya xiliga hada lagu jiro.

Nolol maalmeedkaaga waxaa saamayn ku yeelan kara wax yaalo kale oo kugu xeeran. Waxay noqon kartaa:



Waxyaalaha kugu xiiran tusaale ahaan jir ahaan iyo bulshada kugu xeeran, qalabka caawinaada iyo taagerada dadka kale.

Qodabada qofka la xiriira tusaale ahaan, wuxuu xiiseeyo, caadooyinka iyo qaabka uu u xaliyo mar xalado kala duwan.

Qaab dhismeedka jirka/ qaab shaqeedka jirka tusaale ahaan in qayb ka mid ah jirka dhaawac soo gaaray taasoo sababtey in shaqadii dhaqdhaqaaqa, hurdadii, xasuustii, codkii ama aragii ay saamayn ku yeelatey.

Xaalada caafimaad tusaale ahaan cuduro kala duwan, dhaawacyo ama xaalada caafimaad daro oo baaritaan lagu xaqiijiyey iney jirto.